

# Habdhaqanka Heerka Sare (Culture of Excellence®)

Isku xirida dhibicyada hadafkeena & qiyamyadeena

## Beddelidda aragtida ku aadan da'du ayaa udub dhexaad u ah wax kasta oo aan samayno.

## Waxaanu Nahay Transforming Age.


Shabakadda shurakada Transforming Age waxay ku dadaashaa bixinta hab dhammaystiran oo isku dhafan oo loogu talagalay in gabowga ay guuleystaan dadka aan u adeegno. Waxaan u adeegnaa 'Hal Macmiil' waqtigiiba inagoo adeegsanayna badeecadaha iyo adeegyada lagu bixiyo qaybaha hadafkayaga.



# 5-ta Qaybood ee Hadafkayaga

Astaanta Transforming Age waxay ka dhigan tahay hadafkayaga aan faa'iido doonka ahayn ee isku keen xirayo dhammaanteen oo ay udub dhexaadka u yihiin shanta qaybood ee hadafkaya iyo macmiil kasta.

- Guriyeynta
- Adeegyada Bulshada
- Samafalka
- Iskaashiga
- Tiknoolajiyada/ Farsamada



# Habdhaqanka Heerka Sare

**Habdhaqanka** waa isku jirka caqiidooyinka la wadaago, qiyamyada, caadooyinka, iyo dhaqamada tilmaamaya oo caawiya qeexida koox dad ah.

**Heerka Sare** waxay ka dhigan tahay ku dadaalida in la noqdo qofka dadka ugu fiican. Waxay sidoo kale ka dhigan tahay in la sameeyo horumar oo wax la barto muddo kadib si loo helo natiijooyin wanaagsan.

# Muujinta ficilada, go'aamada, ama fikradaha kala duwan ee COE

- Culture of Excellence (COE) waxay muujisaa sida ficilada, go'aamada, ama fikradaha kala duwan ay ula xiriiraan hadafkayaga, qiyamyadayaga iyo yoolalkayaga.
- Mid kasta oo naga mid ah wuxuu gacan ka geystaa hadafkayaga iyo yoolkayaga markaan si heer sare ah u qabano hawlahayaga oo aan muujino qiyamyadayaga.

"Dhoola cadeyntaada awgeed, waxaad **nolosha ka dhigtaa mid aad u qurux badan.**"

– Thich Nhat Hanh



# Hadafkayaga

**Waxaan abuurnaa fursado aan xadidneyn** si aan kor ugu qaadno nolosha dadka waayeelka ah inagoo isku dareyno guriyeynta, adeegyada bulshada, tiknoolajiyada, samafalka iyo iskaashiga. Waxaanu nahay Transforming Age.

- Marka aan macaamiisheena u abuureyno fursado aan xadidneyn, mid kasta oo naga mid ah wuxuu abuuraa fursado aan xadidneyn si uu saameyn ugu yeesho kooxdayada.
- Waxaan dooranaa inaan saameyn wanaagsan ku yeelano shaqada iyo kooxdayada, inaan is taageerno, oo aan qabano shaqadayada ugu fiican maalin kasta iyo isdhexgal kasta.

Hadafka — Qiyamyada — Yoolalka

# Qiyamyadayaga

Markaan mahadho wanaagsan u abuurno xubnaha kooxdayada ama deganayaashayaga/macaamiishayada, waxaan haysanaa fursad aan ugu noolaano qiyamyadayaga. Sida aan dadka u salaamno, sida aan u daryeelno oo aan kor ugu qaadno dadka, sida aan u samayno waxa saxda ah — maalin kasta.

## Daacadnimo/Hufnaan

- Waxaan u dhaqannaa si daacad ah, oo waxaan samaynaa waxa saxda ah.
- Waxaan nahay dad u heelan shaqada oo run sheega.
- Waxaan ku dadaalnaa shaqada si aan u kasbano aaminaadda oo aan muujino inaan nahay kuwa la aamini karo.

## Wadashaqeyn kooxeed

- Waanu wada shaqaynaa oo waan is taageernaa.
- Waxaan qiimeyneynaa shaqada xubin kasta oo kooxda kamid ah.
- Waxaan muujinaa hogaan si aan ugu adeegno deganayaashayada iyo macaamiishayada.

## Xushmad

- Waxaanu ixtiraamnaa oo aan aqbalnaa qiimaha qof walba.
- Waxaan aqoonsannahay oo aan qadarinaa kala duwanaanshaha kooxdayada, deganayaashayada iyo macaamiishayada.

## Bilic

- Waxaan naxariis, iyo u damqasho u muujinaa dhammaan dadka.
- Waxaan xusnaa oo aan aqbalnaa kala duwanaanshaha dadka oo dhan.
- Waxaan daryeelnaa kooxdayada iyo dadka aan u adeegno.

## Madadaalo

- Waxaan sameynaa madadaalo.
- Waxaan farxad gelinaa shaqadayada, kooxdayada, deganayaashayada, iyo macaamiishayada.
- Waxaan ognahay in dabeecadda wanaagsan ay gacan ka geysato heerka sare ee waxqabadka.

## Hal-abuur

- Waxaan aqoonsanaa fursadaha aan horumar ku gaari karno maalin kasta.
- Waxaan wadaagnaa fikrado si aan u wanaajino sida aan u shaqeyno.
- Waxaan ka wada shaqaynaa in aan abuurno xalal cusub.

## Is-xisaabin

- Waxaan qaadnaa mas'uuliyadda ficiladayada.
- Waxaanu ogeysiinaa kormeerahayaga haddii aanu khalad galno si markaa si degdeg ah loogu xaliyo khaladka.
- Waxaan joogteynaa heerar/miqyaasyo sare.



"Waxaan bartay in dadku ilaawi doonaan waxa aad tidhi, dadku waxay ilaawi doonaan waxa aad samaysay, laakiin dadku waligood ma ilaawi doonaan **sida aad dareensiisay.**"

- Maya Angelou

## Yoolalkayaga Istiraatiijiyadeed

Maalin kasta, waxaan dhammaanteen gacan ka geysanaa yoolalkayaga istaraatiijiyadeed. Siyaabaha ay yoolalkani uga muuqdaan shaqadaadu way kala duwan yihiin waxay ku xidhan yihiin doorkaada, laakiin dhamaantood waa fursado aan ku fulin karno hadafkayaga oo aan ku gaari karno yoolalkan.

- **Noqo hogaamiyaha** adeegyada nolosha waayeelka iyo gabowga. Waxaan muujinaa tusaale/hogaan inagoo adeegsaneyno Habdhaqanka Heerka Sare ah.
- **Kobac oo hal-abuur yeelo;** Dib-u-maalgeli barnaamijyada iyo hindisayaasha cusub si aan u ballaarino hadafkayaga. Waxaan nahay kuwa wax daneeyo oo si degdeg ah u falgalo.
- **Noqo qof qaas ah.** Bixi xalal qaas ah, la awoodi karo oo la heli karo oo loogu talagalay adeegyada nolosha waayeelka iyo gabowga. Waxaan xallinaa mashaakilaadka waxaana abuurnaa fursado.
- **Noqo shaqo-bixiyaha la doorbidao** oo ku noolow Habhaqankayaga Heerka Sare ah. Waxaan leenahay miqyaasyo loogu talagalay dadka, badeecada iyo habka.
- **Noqo urur ay hagayaan xog iyo aqoon.** Waxaan nahay kuwo ku jihaysan natiijooyinka waxaana isticmaalnaa xogta si aan go'aanno degdeg ah u gaarno.
- **Kordhi hawlahayaga asaasiga ah ee saddexda ah:** saamaynta urur aan faa'iido doon ahayn ahaan, waaritaanka bay'ada, hawlgallo hufan.





“Dadku ma daneeyaan waxa aad taqaan ilaa ay ogaadaan **qiyaasta aad iyaga daryeesho.**”


- Theodore Roosevelt

> “Waxyaabaha aadka u wanaagsan ee ganacsiga marnaba ma sameeyo hal qof; waxaa sameeyo **koox dad ah.**”
>
> - Steve Jobs



# Hal Koox

Waqtigayaga, dadaalkayaga, tamartayada, iyo hab-dhaqankayaga ayaa muhiim u ah Habdhaqanka Heerka Sare ah (Culture of Excellenc), waxaana dhammaanteen qayb ka nahay kooxda Transforming Age, waxaana deganayaashayaga/ macaamiishayada u abuurnaa fursado aan xadidnayn. Maalin kasta, waxaad qayb ka tahay dhaqdhaqaaq kor loogu qaadayo nolosha dadka aan u adeegno. Dhammaanteen waxaan qayb ka nahay ah hal koox, waxaanan aaminsanahay hoggaan ku salaysan wanaaga dadka loo adeegayo.



# Adeeg Heer Sare ah

Waxaan u heellannahay heerka sare marka aan daryeeleyno deganayaashayaga ama macaamiishayada, iyo sidoo kale marka aan daryeeleyno xubnaha kooxdayada. Heerarkan ayaa qeexaya dhaqamada iyo ficillada uu mid kastoo naga mid ah ka filayo midka kale.

## Sida aan u muujino aragti heer sare ah:

- Waxaan qof walba ula dhaqannaa si naxariis iyo u damqasho leh.
- Waxaan ka warqabnaa agagaarkayaga; waxaan salaamnaa dadka nagu xeeran, oo waxaan diirada saareynaa qofka na hor joogo.
- Waxaan ula xiriirnaa dadka si xirfad iyo soodhaweyn leh.
- Waxaan raacnaa hab-qurxinta iyo lebbiska la filayo.
- Uma isticmaalno qalabyada elaktrooniga ah dano shakhsiyeed, marka laga reebo waqtiyada nasashada.
- Waxaan xaddidnaa isticmaalka taleefanada gacanta marka ay nala joogaan dad kale.
- Waxaan joogteynaa in wada hadalada noqdaan kuwa xirfad leh oo ah mugga ku habboon.
- Waxaan ugu shaqeynaa oo aan ugu raaxaynaa deganayaasha ama macaamiisha sidii inagoo gurigooda joogno.

## Sida aan ugu shaqayno mulkiile ahaan:

- Waxaan qaadnaa mas'uuliyadda natiijooyinka wanaagsan, waxaana nala siiyay awood aan ku gaarno go'aamo horseedi doona natiijooyin wanaagsan.
- Waxaan aad u jecelnahay muujinta qiyamyadayaga iyo inaan samayno isbeddel.
- Waxaa naga go'an guusha hadafkayaga, kooxdayada, iyo deganayaashayaga/macaamiishayada.

## Sida aan u bixino mahadho heer sare ah:

- Marka na loo soo bandhigo su'aal ama walaac, waxaanu xalal siinaa deganayaasha, macaamiisha ama xubnaha kooxda.
- Waxaan si daneyn iyo naxariis leh u weydiinaa, “Ma jiraa wax kale oo aan kuu samayn karo?” kahor inta aanan dhamayn wada hadalka.
- Marka nala waydiisto tilmaan, waxaanu raacnaa macmiilka ama waxaan raadinaa qof awoodi karo inuu raaco.
- Waxaan mulkinaa su'aalaha ama walaacyada innagoo isticmaaleyno **H.E.A.R.**:

H — **Maqal arrinta.** Si taxadar leh ayaan u dhegeysanaa si aan u xaqiijino inaan fahamnay su'aasha ama walaaca.

E — **U damqasho.** Waxaanu qofka ogeysiinaynaa in aanu fahansanahay aragtidiisa iyo sida uu dareemayo.

A — **Raaligali.** Waxaan raali galin ka bixinaa arrinka iyo wixii dhib ah ee ka dhashay arrinku.

R — **Xali.** Waxaan ku dadaalnaa inaan sameyno wax walba oo aan awoodno si aan u xalinno arrinku ama aan u helno cid xallisa.





# Hogaan Heer Sare ah

Waxaan koox ahaan muujinaa waxqabad heer sare ah inagoo qabanayna shaqadayada ugu wanaagsan oo adeegsaneyno ha-dhaqan wanaagsan oo muujino inaan qaban karno shaqada. Waxaan leenahay heerar sare, oo dhaqamadan iyo ficilladani waxay muujinayaan waxa aan uga baahanahay dhammaan xubnaha kooxda.

## Sida aynu u muujino hogaanka:

- Dhammaanteen waxaan nahay hoggaamiyeyaal, waxaana sameynaa waxa saxda ah. Waan isku adeegnaa.
- Waxaan aqbalnaa kala duwanaanshaha, sinnaanta iyo ka mid ahaanshaha, waxaana ixtiraameynaa kala duwanaanshaha dhaqameed.
- Waxaan daryeeleynaa oo aan taageernaa dhammaan xubnaha kooxda.
- Waan ka hadalnaa marka aan aragno fursad lagu sameyn karo horumar.
- Waxaan si firfircoon uga qayb qaadanaa abuurida bay'ad shaqo oo wanaagsan oo caafimaad leh, gaar ahaan wakhtiyada diiqada/istireeska.
- Waxaan la xisaabtanaa nafteena iyo dadka kaleba.
- Waxaan xaqiijinaa in fikradda ugu fiican ay guuleysato, mana eegno jagada ururka.
- Marka go'aan la gaaro, waxaanu u heellannahay go'aanka oo horay ayaan u soconaa.
- Waxaan u xallinaa khilaafka si degdeg ah oo xirfad leh.
- Waxaan soo dhawaynaynaa xubnaha cusub ee kooxda.

## Sida aan u gaarno natiijooyinka:

- Waxaan aqbalnaa mas'uuliyadda falalkayaga iyo natiijooyinkayaga.
- Waxaan sameynaa intii karaankeena ah waxaana leenahay hab-dhaqan ah inaanu qaban karno hawlaha.
- Waxaan shaqadayada u qabanaa si sax ah oo degdeg ah, marka koowaadba.
- Waxaan u qabanaa shaqadayada si sax ah oo dhamaystiran, waxaan si buuxda u gudanaa masuuliyadaha kamid ah shaqadayada.
- Waxaan soo saarnaa natiijooyinka ugu tayo sareeyo iyo natiijooyinka ugu wanaagsan. Waxaan yeelanaa saameynta ugu badan inagoo adeegsaneyno shaqadayada.

- Waxaan u eexanaa waxqabadka; dib uma dhigno waxqabadka.
- Waxaan saadaalinaa baahiyaha iyo dhibaatooyinka, waxaana tixgelinaa natiijooyinka kala duwan ee macquulka ah, ee aan la filan karin.
- Waxaan ku dadaalnaa kaydinta dhaqaale waxaana yareynaa kharashaadka. Ma nihin kuwa ku ciyaara dhaqaalaha.
- Waxaan had iyo jeer ku dadaalnaa in aan helno dhaqaale dheeri ah sababtoo ah haddii aysan jirin wax dheeri ah, markaa ma jiro hadaf. Xiriir kastaa waa inuu ahaado mid dhaqaale ahaan waarayo muddo dheer si uu si wax ku ool ah ugu daboolo saameynta hadafka.
- Waxaan si joogto ah u horumarinaa xirfadaheena xirfadeed iyo kuwa shakhsiyeed.
- Waxaan samaynaa horumar maalin kasta. Isku dhafka horumarka.
- Waxaan si taxadar leh u maamulnaa kulamadeena si aan u yareyno waqtiga aynaan si toos ah ugu adeegin deganayaashayada ama macaamiishayada.
- Arrimuhu waanu fududaynnaa.

## Sida aan u bixino isgaarsiin wanaagsan:

- Waxaan sameynaa wada-xiriir marka shaqada si fiican loo qabto.
- Waxaan mahadnaqayaga la wadaagnaa xubnaha kooxda.
- Waxaan leenahay hufnaan. Waxaan soo dhawaynaynaa doodaha furan, gaar ahaan marka aanan isku firkad ahayn.
- Marka aanan isku fikrad ahayn, waxaan si toos ah ugala xaajooneynaa dadka ku lugta leh.
- Waxaan ixtiraamnaa qarsoodiga, waxaanan isticmaalnaa go'aamintayada ugu fiican marka aan qorayno, duubeyno, diiwaangelineyno ama aan ka hadlayno macluumaadka deganaha/macmiilka ama xubin katirsan kooxda.
- Dadka ma xamanno.
- Waxaan u hadalnaa si xirfadaysan; kor uma qaadno codkayaga inay jiraan sababo badqab mooyee.
- Waxaan si kooban u gudbinaa 5-ta W iyo 1H (Who (Cida), What (Waxa), When (Goorma), Why (Sababta), Where (Goobta), iyo How (Sida)).
- Waxaan dhammaan iimaylada, fariimaha codka ama fariimaha kale ka jawaabnaa 24 saacadood gudahood, mar kasta oo ay suurtagal tahay.

# Badbaado/badqab Heer Sare ah

Waxaan badqab heer sare ah u muujinaa deganayaashayada ama macaamiishayada, bulshadayada, nafsadeena, iyo xubnaha kooxdayada. Heerarkan/miqyaasyadan ayaa looga baahan yahay dhammaan xubnaha kooxda.

## Sida aan kor ugu qaadno badqabka heer sare ah:

- Waxaan soo sheegnaa oo aan wax ka qabanaa xaaladaha, falalka ama nidaamyada aan badqabka ahayn si bay'ada shaqada looga dhigo mid badqab u ah qof kasta.
- Waxaan mar kasta isticmaalnaa qalabka badqabka ee loogu talagalay waajibaadkayaga na loo xilsaaray waxaana ka caawinnaa deganayaasha/macaamiisha inay isticmaalaan qalabka badqabka.
- Waxaan xusuusinaa xubnaha kooxda iyo deganayaasha/macaamiisha habraacyada badqabka.
- Waxaan si firfircoon uga qaybqaadannaa laylisyo iyo tababarro.
- Waxaan raacnaa dhammaan tilmaamaha iyo siyaasadaha la xiriira isticmaalka kombuyuutarrada shaqada iyo dhammaan nidaamyada la xiriira, aaladaha, iwm.

## Sida aan ugu dadaalno jawi/bay'ad heer sare ah:

- Waanu ka warhaynaa agagaarkayaga.
- Waxaan bay'adayada shaqada ka dhignaa mid badqab ah, qurxoon, nadiif ah oo xirfad leh.
- Waxaan qaadnaa qashinka aan aragno oo waxaan u tuurnaa si habboon.
- Waxaan isla markiiba ka soo warbixinaa alaabta guriga, qalabka ama aaladaha jabay.

## Sida aan u xaqiijino u hoggaansanaan heer sare ah:

- Macluumaadka deganaha/macmiilka, ganacsiga ama xubnaha kooxda ee qarsoodiga ah lama wadaagno cid kale inagoon fasax ka helin kormeerahaaga.
- Waxaan ognahay u hoggaansanaanta iyo shuruudaha sharciga ah ee la xiriira bay'adayada shaqada iyo waajibaadka naloo xilsaaray.
- Waxaan isla markaaba soo sheegnaa fal kasta oo looga shakisan yahay ama la og yahay inuu yahay rabshado, ku xadgudubka ama dayaca waayeelka, dhibaatayn, xoogsheegasho, xatooyo, ama khiyaamo.
- Waxaan isla markiiba soo sheegnaa wixii dhaqdhaqaaq ama shay ah oo laga shakiyo.
- Wixii walaacyo ah ee aanan ku faraxsaneyn in aan uga warbixino maamulka ayaan soo sheegnaa inagoo adeegsanayna Khadka Tooska ah ee U-hogaansanaanta: 1-800-275-9575, inagoo u mareyno transformingage.org ama koodhka/baadisooca QR.

*Wax dheeri ah ka ogow ama ka soo warbixi.*

"Badbaadadu/ badqabku maaha qalab ee waa **xaalad maskaxeed.**"

- Eleanor Everet



# Muujinta ficilada, go'aamada, ama fikradaha kala duwan ee COE

Dhammaanteen waxaan u baahanahay inaan isku xirno hadafkayaga, qiyamyadayaga iyo yoolalkayaga inagoo adeegsanayna Habdhaqanka Heerka Sare ah (Culture of Excellence, COE). Isticmaal booskan si aad isugu shakhsiyeyso Habdhaqanka Heerka Sare ah (Culture of Excellence) iyo sida aad isugu xirto hadafkayaga, qiyamyadayaga iyo yoolalkayaga.




- Maxaad u taqaan Habdhaqanka?
- Maxaad u taqaan Heerka Sare?
- Sideed ugu xiri kartaa hadafkayaga iyo qiyamyadayaga?
- Waa maxay xigashooyinka kugu dhiirigeliya inaad muujiso dadaalkaaga ugu badan?

# MAHADSANID

Waad ku mahadsan tahay ku biirista qoyska Transforming Age, taageeridda hadafkeena iyo wanaajinta nolosha dadka waayeelka ah.

Waxaan jeclaan lahaa inaan ra'yigaaga maqalno. Waan soo dhawaynayaa fikradahaaga, ha weynaadaan ama ha yaraadaan, dhaleecayntaada ama jawaab-celintaada, kaliya iimayl iigu soo dir ideas@transformingage.org

**Si wadajir ah ayaan u bedeli karnaa dunida!**



**Torsten Hirche**

Madaxweynaha & Madaxa Fulinta

TransformingAge.org
425-559-6301

© 2012 Transforming Age
Raaca 5.0 2025